Daawaynta Tiibishada

Waxaad bilaabaysaa daawo qaadasho gaaraysa lix ilaa sagaal bilood oo lagaa daawaynayo Tiibisho (TB). Marmarka qaarkood mudada daaweyntu ka badan ayey qaadataa.

Daawooyinka Tiibishada

Daawo waliba waxay keeni kartaa dhib, daawada Tiibishaduna kuwaas ayey ka mid tahay. U qaado daawada oo dhan si waafaqsan awaamiirta dhakhtarku ku siiyey. Dhakhtarkaagu wuxuu la soconayaa sida ay kuu saamayso daawo kasta oo laguu qoray si lagaaga daaweeyo Tiibishada. Hadday dhibaato keento, waa inaad isla markiiba dhakhtarkaaga u sheegtaa.

Qaar ka mid ah dhibta ay keeni karto ayna tahay inaad ka digtoonaato inta aad Daawada Tiibishada qaadanayso waa:

- Iscuncun joogta ah.
- Caloosha oo kacsan, Yaqyaqsi ama rabitaanka cuntada oo kaa lunta.
- Dareemid aad dareento in wax ku mudmudayaan, kabuubyo ama xanxanto kaa qabata gacmaha ama lugaha.
- Fururuc, dareemid jug ama maqaarka oo jaallo noqda.
- Indhaha oo lagu hor yaaco.
- Midabka kaadida oo madoobaata. ama/iyo
- Indhaha oo ku noqda jaallo ama huruud.

Daawooyinka soo socda oo dhan waxaa loo isticmaalaa daaweynta Tiibishada dhamaana waxaa loo qaataa Kiniini ahaan.

ISONIAZID

Isoniazid waxay kaa dhigi kartaa qof daalan, waxayna sababi kartaa yaqyaqsi iyo cunada oo aadan rabitaan u hayn iyo, si aan badnayn, kabuubyo iyo xanxanto gacmahaaga iyo lugahaaga.

RIFAMPICIN

Riıfampicin-tu waxay hoos u dhigtaa waxtarka kiniiniga uurka lagaga hortago. Dumarka qaadanaya kiniiniga ka hortaga uurka waxay u baahan yihiin inay u sheegaan dhakhtarkooda iinta aanay bilaabin Rifampicin-ta. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad kala hadasho dhakhtarkaaga ama goobta Qorshaha Qoyska noocyo kale oo lagaga hortago uurka.

Haddii ay kugu jiraan lensis ama aad qaadato lensis, u sheeg dhakhtarkaaga maadaama daawadani wax yeelli karto.

Rifampicin-tu waxay sababi kartaa in midabka kaadidaada, calyadaada iyo dhididkaagu noqdaan huruud mase aha inaad ka werwerto.

ETHAMBUTAL AMA MYAMBUTAL

Inkastoo goobta daaweynta ee aad tagto ay si joogta ah u eegayaan aragtida indhahaaga, waxaad u baahan tahay in aad u sheegto dhakhtarkaaga isla markiiba haddii aad dareento wax dhibaato ah oo aragtida khusaya. Waana inaad joojisaa qaadashada daawada Tiibishada ilaa dakhtarkaagu talo kale ku siinayo.

PYRAZINAMIDE

Pyrazinamide-du waxay kuu keeni kartaa yaqyaqsi iyo rabitaanka cunada oo kaa luma. Daawadaan waxaa badanaa la isticmaalaa keliya labada ilaa saddexda bilood oo u horeeya daawo qaadashada. U sheeg dhakhtarkaaga isla markiiba xanuun, qandho , furuuruc ama bugto kasta oo aadan fahmi karin .

U QAADO DAAWADA SI JOOGTO AH

Waa muhiim inaad daawada u qaadato sida dakhtarkaagu kugula taliyey. Daawa kasta oo loo qaato si aan joogto ahayni waxay keeni kartaa dhibaato aad u xun, iyo koritaanka u adkaysashada daawada. Ka fogow cabitaanka khamriga maadama ay siyaadin karto ku sumoobida daawada iyo dhibta kale ee ay keeni karto.

BAARITAANKA WAQTIGA DAAWA QAADASHADA

Dakhtarkaagu wuxuu codsan karaa in la baaro dhiigaaga waqti walba , si loo xaqiijiyo in daawadu u daawaynayso Tiibishada si wax ku oola.

baaritaano kale, sida baaritaanka candhuufta iyo kaadida, ayaa la isticmaali karaa si loo eego isbedelkaaga.

Ma u baahn tahay Macluumaad badan?

Macluumaadka intaas ka badan la xiriir:

TB Program
Disease Control Section
Department Of Human Services
GPO Box 1670N
Melbourne 3001
Phone (03) 9637 4115

Waxaa daabacay Unuga Cudurada Faafa, Laanta Caafimaadka Dadweynaha, Wasaarada Adeegyada Biniaadamka.

Macluumaadkani wuxuu ku salaysan yahay macluumaadka la helli karo ee ugu dambeeye laga bilaabo January 1998. Waxaa naqshada u sameeyey Unuga isgaarsiinta ee Adeega Biniaadamka.

Waxaa laga helli karaa Internetka http://hna.ffh.vic.gov.au